



5575 Boundary Road, Vancouver, B.C. Canada V5R 2P9

Tel: 604-254-0469 ♦ Toll Free: 1-877-475-6777 ♦ Fax: 604-254-2321 ♦ www.mosaicbc.org

TURJUMAADDA GAAR AHAANEED

Adeegyada la helo

Caadi: 5 maalmood oo shaqo

Deg deg: 2 maalmood oo shaqo ugu yaraan

Qiimaha Turjumaadda

Sicirka turjumaaddu wuxuu ku xiran yahay nooca aad doonaysid iyo tirada kalmadaha ingiriiska

ADEEGYADA CAADIGA AH		ADEEGYADA DEG DEGGA AH	
TIRADA KALMADAHA	SICIRKA	TIRADA KALMADAHA	SICIRKA
1-125 kalmadooood	\$35.00	1-125 kalmadooood	\$50.00
126-210 kalmadooood	\$40.00	126-210 kalmadooood	\$60.00
211- + kalmadooood	\$0.20/kalmaddii	211- + kalmadooood	\$0.30/kalmaddii

Siciradani ma khuseeyaan turjumidda waraaqaha ganacsiga ama shirkadaha. Qiima saa'ida ayaa raaca afafka an ku salaysnayn alfabeetada Roomanka sida (shiiinayska, jabbaanayska, kooriyaanka, iwm). Qiimaha warqadda asalka ah waa \$40.00 halkii bog ama ka badan ayadoo ku xiran adkaanshaha habaynta.

Waxa la sameeyo markaad u baahan tahay turjumaad

Markaad codsanaysid adeegyada turjumaadda waraaqaha nidaamka caadiga ah oo la raacaa waa sidan:

Warqadahaaga keen waaxda turjumidda MOSAIC oo ku taal ciwaanka soo socda:

5575 Boundary Road

Vancouver, BC V5R 2P9

Taleefonka: (604) 254-0469 Khadka gaarka ah 1221

Saacadaha shaqada:	Isniinta	9:00 am - 6:00 pm
	Talaadada, Khamiista, Jimcaha	9:00 am - 5:00 pm
	Arbacada	9:00 am - 3:00 pm

Shaqaalahayaga adeegga macmiisha ayaa waxa uu ku siin doonaa qimma ku meel gaar ah oo ku salaysan qiyasta tirada kalmadaha ingiriiska. Fadlan xusuusnow in qiimaha kama dambaysta ahi ku xirnaan doono tirada runta ee kalmadaha ingiriiska ee turjumaadda, sidaa awgeedna qiimuuhu ka badnaan karo intii la qiyasay. Haddii ad go'aansatid in laguu turjumo warqadahaaga, waxaa lagu waydiin doonaa inaad dabaaji ahaan uga tagtid 65% qiimaha la qiyasay turjumaadda. Waa xad ku bixin kartaa caddaan, American Express, Visa, MasterCard, ama Kaarka Bangiga (Interac). Waxaa lagu siin doonaa cadayn muujinaysa dabaajigii aad u bixisay turjumaaddaada (intii ad bixisay, taariikhda iyo waqtiga qaadashada, sicirka khuseeyaa turjumaaddaada, iwm).

Haddii aadan si ka duwan u codsan, turjumaadda kama dambaysta ahi waxay noqanaysaa mid la tasdiiqiyay, kuna daabacan warqadda waaxda turjumaadda MOSAIC ayna la socoto nuqul(koobbi) warqaddaadii hore iyo cadaynta turjumaanka oo saxiixan oo xaqiijinaysa sax ahaanta turjumaadda.